Ciidanka Booliiska

Wasaaradda Arrimaha Gudaha

DRAFT

# XEERKA CIIDANKA BOOLIISKA SOMALILAND

# SOMALILAND POLICE ACT

# CUTUBKA KOWAAD

# QODOBBO GUUD

**Qod:1aad**
**Fasiraad**

Weedhahan iyo erayadan haddaan si ka duwan loogu fasirin xeerka dhexdiisa, waxaa loola jeeda sidan soo socota:

**Madaxweyne:** Madaxweynaha waxa loola jeedaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wasiir:** Wasiir waxa loola jeedaa Wasiirka Arrimaha Gudaha.

**Taliyaha Ciidanka**: Waxa loola jeedaa Taliyaha Ciidanka Booliiska.

**Booliiska Somaliland**: Waxaa loola jeedaa ciidanka Booliiska

**Talis**: Waxaa loola jeedaa Taliska Ciidanka

**Qayb:** **Waa talis Ciidan oo heer Gobol ah**

**Waax:** **Waa Ciidan Xirfad gaar ah u qaabilsan Ciidanka Booliiska, sida, ciidanka nabadgelyada wadooyinka, Dembi baadhista iyo ciidanka wardoonka.**

**Sarkaal:** Sarkaal waxa loola jeedaa marka sharcigan la eegayo, xubin kasta oo leh darajo ka sarraysa Askari Boolis ah.

**Askari Booliis ah:** Askari boolis ah waxa loola jeedaa xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliiska Somaliland oo aan darajo lahayn.

**Mudnaan**: Waxaa loola jeedaa kala horreynta xubnaha Booliiska Somaliland "seniority"

**Mutaysi:** Kasbashada dallaacadeed ama u garashada/aqoon ee ay xubintu istaahisho "Merit."

**Hakin:** Waxaa loola jeedaa ka-joojin shaqada si ku-meel-gaadh ah "Suspension."

**U-qallan**: Waxaa loola jeedaa ku-habboonaanta, u-bislaanshaha ama u aqoonsiga tilmaanta qofka laga bixinayo ama laga doonayo.

**Qod: 2 aad**
**Magaca Xeerka**

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa **Xeerka Ciidanka Booliiska Somaliland,** waxaana loo soo gaabsan karaa **Xeerka Booliiska.**

**Qod: 3aad**
**Hadafka xeerka**

Xeerkan waxaa loola dan leeyahay in lagu gaadho ujeedooyinkan soo socda:

1. In lagu caddeeyo qaab-dhismeedka, awoodaha iyo waajibaadka ciidanka Booliiska.

2. In-waajibaadka~~,~~ xuquuqaha iyo masuuliyada xubnaha Booliiska ahaadaan kuwo sharciga ku salaysan

3. In kor loo qaado lana tayeeyo kartida Ciidanka Booliiska Somaliland iyo adeegyada bulsho ee ay Qaranka ugu xilsaaran yihiin.

4. In Booliiska Somaliland, loo tababaro, loonna habeeyo qaab Booliis Rayid ah.

**Qod: 4aad**
**Dabbaqaada Xeerka**

Xeerkan waxaa hoos imanaya/ lagu dabaqayaa dhamaan xubnaha Ciidanka Booliiska Somaliland ee waqtiga xeerkani dhaqangalo u diiwaangashan Ciidanka Booliiska Somaliland iyo xubnaha si xeerkan waafaqsan loogu qaato Ciidanka Booliiska Somaliland;

# CUTUBKA LABAAD
# MAQAAMKA GUUD EE CIIDANKA BOOLIISKA

**Qod: 5aad**
**Booliiska Somaliland**

1. Boolisku waa qayb ka mid ah Ciidamada Jamhuuriyadda Somaliland
2. Booliiska Somaliland wuxuu u adeegaa bulshada, isagoo ka madaxbanaan loolanka siyaasadeed, dhexna u ah Xisbiyada/ururada siyaasadeed ee Qaranka iyo bulshadaba.
3. Booliiska Somaliland wuxuu hawshiisa u gudanayaa si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda Qaranka

DRAFT

4. Xaalada Dagaalka iyo xaalada degdega ah Booliiska Somaliland waxay ka qayb qaadanayaan difaaca dalka isagoo gacan siinaya Ciidanka Qaranka.

**Qod: 6 aad**
**Mabaa'diida Booliiska Somaliland**

Booliiska Somaliland waxaa loo dhisay in ay masuul ka ahaadaan:

1. Sugida amaanka gudaha barriba Jamhuuriyadda Somaliland
2. Hirgelinta Dastuurka iyo shuruucda Jamhuuriyadda Somaliland

**Qod: 7aad**
**Xarumaha Ciidanka Booliiska Somaliland**

Xarumaha dhexe ee hoggaaminta ciidanka Booliisku waa Caasimada Somaliland.

**Qod: 8 aad**
**Xaalada Qaanuuneed**

1. Booliiska Somaliland wuxuu leeyahay shaqsiyadiisa qaanuuneed ee u gaarka ah, isagoo Yeelanaya magaciisa iyo astaantiisa u gaarka ah;

2. Booliiska Somaliland wuxuu leeyahay madaxbanaanidiisa maamul iyo maaliyadeed, gudashada shaqadiisana waa u madaxbanaan yahay.

**Qod: 9 aad**
**Astaamaha Ciidanka Booliiska Somaliland**

1. Astaanta ciidanka Booliisku waa madax goodir oo dulsaaran barkin hareerahana kaga wareegsan yihiin laba caleemood oo ku dhex jira midab Buluug ah.
2. Astaanta Ciidanka Boolisku waxay gaar u tahay Ciidanka Booliiska Somaliland oo keliya.
3. Astaanta Ciidan Booliiska Somaliland waxay ka muuqanaysaa dirayskooda Ciidanka, shaambadahooda, aqoonsigooda iyo waxkasta oo u gaar ah.

**Qod: 10 aad**
**Xuduuda hawl fulineed ee Booliiska Somaliland**



DRAFT

Booliiska Somaliland wuxuu ka hawlgelayaa dhamaan xuduudihiisa dhuleed  ee JSL, iyo weliba goob kasta oo kale oo sharciga Jamhuuriyada Somaliland ama sharciga Caalamiga ahi ogol yahay in ay ka hawlgalaan.

# CUTUBKA SADEXAAD

# HOGAAMINTA GUUD

**Qod: 11 aad**
**Doorka & awoodaha Madaxweynaha**

Madaxwaynuhu waxa uu kuleeyahay ciidanka Booliiska awoodaha ku xusan qodobada 90aad, farqadiisa 4aad ee dastuurka qarankanka waana sidan:

1. Madaxweynuhu waa Taliyaha Guud ee Ciidamada Jamhuuriyadda Somaliland oo Ciidanka Boolisku ka mid yahay.
2. Madaxweynuhu wuxuu ku leeyahay Ciidanka Booliiska Somaliland awoodahan soo socda:

   a) Magacaabida iyo xil ka qaadista Taliyaha Ciidanka Booliiska iyo Taliye ku xigeenka Ciidanka.
   b) Hawlaha kale ee xeerkan ama xeerarka kale awood u siiyeen.

**Qod: 12 aad**
**Doorka Wasaaradda Arrimaha Gudaha**

1. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo metelaya Wasaaradu wuxuu ku leeyahay ciidanka Booliiska somaliland awoodahan soo socda:

   (a) Wuxuu kala taliyaa_ Madaxweynaha magacaabista iyo xil ka qaadista Taliyayaasha iyo T/xigeenada Ciidanka Booliiska Somaliland.
   (b) Abuuridda qaybo/laamo cusub oo ka mida ciidanka Booliiska Somaliland isaga oo la tashanaya taliyaha ay khusayso.
   (c) Soo saarista xeernidaamiyaha  xeerkan isagoo la tashanaaya taliyaha Ciidanka.
   (d) Soo saarista tilmaamo, hagayaal guud oo lagu fulinayo siyaasada Qaranka iyo qorshayaasha amaanka dalka la xidhiidha.
   (e) Wuxuu kala taliyaa Taliyaha Ciidanka Booliiska Somaliland, magacaabista, bedelka iyo xil ka qaadista Hogaamada iyo taliyayaasha Qaybaha.
   (f) Kormeerka iyo dul kala socodka hawlaha ciidanka Booliiska Somaliland.
   (g) Dib u eegista go'aamada Taliyaha ee anshax marinta xubnaha Booliiska ee looga soo cawdo.
   (h) Fulinta iyo go'aan ka qaadashada warbixinaha xafiiska baadhista ee qodobka 13 aad ee Xeerkan lagu sheegay.

2. Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxay kaloo u xilsaaran tahay tayaynta, dib u habaynta iyo horumarinta Ciidanka Booliiska Somaliland.
3. Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxa xil ka saaran yahay in ay mudnaanta siiso daryeelka iyo xanaanada xubnaha Booliiska iyo qoysaskooda marba inta awooda dhaqaale ee xukuumadu u saamaxayso.
4. Wasaaradda Arrimaha Guduhu waa in ay dejisaa qorshe ay xubnaha Booliiska ugu raadinayso Tababaro dibadeed, Aqoon-dirsad iyo Waxbarasho Gudaha iyo dibedaba ah.

**Qod: 13 aad**

## Cabashada ka dhanka ah Ciidanka Booliiska.

1. Cabashooyinka ka dhanka ah Ciidanka Booliiska somaliland waxa looga cabanayaa Taliyaha awooda u leh iyadoo lagu hagaajinaayo xafiisyada dabagalka iyo cabashooyinka Booliiska somaliland (Internal Control/complaint Unit),
2. Hadii cabashada uu waxba ka qaban waayo Booliisku amaba cidii cabanaysay ay ku qancin waydo jaawaabta dacwada booliisku ka bixiyay, waxa cida dacwoonaysaa cabashadeeda u soo gudbinaysaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo samayn doonta xafiis u qaabilsan dacwadaha boolliska ka dhanka.

# CUTUBKA AFRAAD
# WAAJIBAADKA GUUD EE CIIDANKA BOOLIISKA

**Qod: 14 aad**
**Waajibaadka guud ee Booliiska Somaliland**

Waajibaadka Ciidanka Booliiska Somaliland waa:

1. Illaalinta nabadgelyada iyo xasiloonnida dadweynaha.
2. Illaalinta nafta, nabadgelyada qofka, hantidiisa iyo isticmaalka xaqa uu qofka siinayo sharcigu, iyada oo aan waxba loo dhimin nabadgelyada qaranka.
3. Fulinta sharciyadda, Xeerka Guud iyo kuwa gaar ahaaneed ee dalka
4. Ka-horteggida, soo-sheegidda, baadhista dacwadaha Ciqaabta ah iyaga oo metelaya Xafiiska Xeer Ilaalinta iyo qabashada dambiilayaasha.
5. Waxay ka oogaan dacwadaha ciqaabta ah goobaha aanu ka dhisnayn xafiiska Xeer-ilaalintu, marka uu u wakiisho xeer-ilaaliyaha guud.
6. Qabashada wixii hawl ah ee ku saabsan illaalinta nabadgelyada ee uu sharcigu farayo Ciidanka Booliiska.
7. U-gurmasho iyo u gargaarka dadweynaha, haddii ay dhacdo masiibo ama aafo dabiici ah.
8. Taageerida ciidanka Qaranka markii looga baahdo ama loogu yeedho difaaca qaranka.



DRAFT

9. In ay Ilaaliyaan hantida, khayraadka iyo dhaqaalaha Qaranka.
10. La-socodka iyo dhowrista diblamaasiyiinta shisheeye, hay'adaha caalamiga ah, martida iyo dalxiisayaasha ee dalka ku sugan.
11. Ururrinta iyo ka warbixinta wirarka amniga qaranka.
12. Hawlaha kale ee Xeerkan ama xeerarka kale ee Qaranku u xilsaaraan.

**Qod: 15 aad**
**Awoodaha Ciidanka Booliiska Somaliland**

Ciidanka Booliisku wuxuu awood u leeyahay:

In ay qabtaan, xidhaan, isagoo sharciga u raacaya cid kasta oo fal denbiyeed diyaarinaya, isku dayday, amaba gashay.

1. In ay qabtaan hub kasta oo aan sifo sharci ah loo haysan
2. In ay qataan hub una adeegsandaan ilaa xadka sharcigu ogol yahay
3. In iyaga oo sharciga raacaya ka hortagaan ama joojiyaan fal kasta oo denbi dhalin kara ama ammaanka wax u dhimaya
4. In ay qaadaaan talaabo kasta oo ay ku gudanayaan waajibaadkooda shaqo.

**Qod: 16 aad**
**Waajibaadka gaarka ah ee xubnaha Ciidanka Booliiska**

1. Xubnaha Ciidanka Booliiska ka tirsan waxaa waajib ku ah:

   a) In ay u hogaansanaadaan xeerkan, Xeer-nidaamiyaha xeerkan hoos yimaada, wareegtooyinka, hab-raacyada, hagayaasha iyo amarada saraakiisha ka saraysa.
   b) In ay u gutaan si daacadnimo, xilkasnimo iyo masuuliyad leh waajibaadka ciidan ee sharcigu farayo ama masuuliyiinta awooda u leh u xilsaaraan.
   c) In ay ixtiraamaan xuquuqda Aasaasiga ah ee Aadamaha, ee sharciga iyo Dastuurku dammaanad qaadeen.
   d) In ay daryeelaan, ilaaliyaan qalabka, hantida iyo hubka ciidanka Booliiska ee ay gacanta ku hayaan ama masuulka ka yihiin.
   e) In ay ku dhaqmaan asluub dhaqameedka diinta iyo dhaqanka wanaagsani farayaan.
   f) In ay si naxariisle u gacan qabtaan qof kasta oo jilicsan.
   g) In ay gurmad u fidiyaan ama gurmad u doonaan qof kasta oo khatari soo food saarto.
   h) In ay dhawraan magaca sumcada iyo haybadda Ciidanka Booliiska Somaliland.

DRAFT

i) In aanay hubka ciidanka u bandhigin dayacaad una suuragelin in ay isticmaalaan dad rayid ah, caruur, dad xiskoodu dhiman yahay ama aan masuul ahayn.
j) In ay Niyad sami u muujiyo dalkiisa
k) In ay ilaaliyaan danta dalka iyo in ay u gutaan waajibaadkooda si karti iyo amaano ku jirto.
l) In ay fuliyaan dhamaan awaamirta iyo go'aamada madaxda.
m) In ay ka soo baxaan dhamaan hawlaha shaqo una sameeyo wakhtiyo gaar ah oo u gudanyo waajibaadkiisa shaqo

**Qodobka 17aad**
**Waxyaalaha ka reeban Xubnaha Ciidanka iyo anshax-marinaha**

**Xubinta Ciidanka Booliiska waxaa reeban:**

1. In aanay dan gaar uah u adeegsan awoodooda iyo haybadooda Boolisnimo.
2. In ay qabtaan shaqo kale oo ka duwan tan ciidanka inta ay ciidanka ka tirsan yihiin.
3. In aanay kala hor iman hub Ciidamada kale ee Qaranka, Ciidanka Booliiska dhexdiisa ama dadka rayidka ah, marka laga reebo xaaladaha sharcigu u ogolaaday.
4. Inay Xubin ka noqdaan Xisbi siyaasadeed ama urur Siyaasadeed.
5. Inay bixiyaan xog ama ka waranto xaalad ciidanku la kulmay ama xubintaasi la kulantay.
6. In aay aqbalaan, hadyad ama wixii lagu sharfo, haday tahay mid si toos ah lagu siiyey ama cid kale loo soo mariyey.
7. Inay iscasilaadeeda soo gudbiso iyada oo lagu jiro xaalad dagaal, xaalad degdeg ah ama baadhisi ku socoto.
8. Waxaa banaan in xubinta Ciidanka Booliiska ee lagu helo gef ka dhan ah xeerkan lagu qaado mid ka mid ah anshax-marinahan.

a) Digniin
b) Mushahar ka goyn aan ka badnayan afar dalool oo meel mushaharka xubinta muddo aan ka badnayn laba bilood.
c) Guno ka joojin muddo aan ka badnayn saddex bilood.
d) Dalacaad ka reebis muddo aan ka badnayn sanad xilliguu mutaystay.
e) Xadhig asluubeed aan ka badnayn 42 maalmood.
f) Cida awoodda u leh anshax marinta waxa lagu qeexi doonnaa xeer-nidaamiyaha Xeerkan.

# CUTUBKA SHANAAD

# QAAB-DHISMEEDKA BOOLIISKA SOMALILAND

**Qod: 18 aad**

**Qaab-dhismeedka**

Qaab-dhismeedka Ciidanka Booliiska Somaliland waxa uu ka kooban yahay;

B) Taliska Ciidanka Booliiska oo ka kooban
1) Taliye
2) Taliye ku xigeen
3) Hoggaamo

T) Qaybo iyo Waaxo toos u hoostag Taliska.

**Qod: 19 aad**
**Taliyaha Ciidanka Booliiska, Magacaabista, waajibaadkiisa & awoodihiisa**

1. Sarkaalka Taliyaha Ciidanka Booliiska loo magacaabayaa waa in uu karti, aqoon, waaya'aragnimo, awood hogaamin oo uu ku hanan karo xilkaa leeyahay.
2. Madaxwaynuhu isagoo la tashanaya Wasiirka Arrimaha Gudaha wuxuu xilka ka qaadi karaa Taliyaha Ciidanka Booliiska Somaliland
3. Taliyuhu waa masuulka ugu sareeya hogamaaminta iyo maamulka Ciidanka Booliiska
4. Taliyaha Ciidanka Booliiska Somaliland isagoo dhowraya xeerarka iyo xeer-nidaamiyaha u degsan Ciidanka Booliiska, wuxuu awood u leeyahay;

a) Isu duwida hawlaha waaxyaha iyo qaybaha Ciidanka Booliiska Somaliland.
b) Jaangoynta tirada guud ee xubnaha Ciidanka Booliiska Somaliland, markuu la tashado Madaxweynaha iyo Wasiirka.
c) Amarka iyo xilka hawlgelinta Ciidanka Booliiska; iyagaana masuul uga noqonaya Dawladda, isagoo sii maraya Wasiirka Arrimaha Gudaha.
d) In uu la socodsiiyo Wasiirka Arrimaha Gudaha wararka muhiimka ah, marka loo eegayo xaaladda guud iyo kuwo gaar ahaaneed ee dalka.
e) Tayaynta, horumarinta iyo kor u qaadista tayada iyo kartida Ciidanka.
f) In isagoo la kaashanaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha waa uu u hawlgalo in Booliisku yeesho Gaadiid Caafifaad iyo xarumo caafimaad, oo u gaar ah.
g) Isaga oo dhiirigelinaya kartida hawl fulineed ee waaxyaha iyo qaybaha ciidanka Booliiska, qalabaynta iyo xannaanada Booliiska wuxuu fulinayaan:-
    I. Hawsha Ciidanka Booliiska ee dalka oo dhan, isagoo dhawraya Dastuurka Qaranka, islamarkaana raacaya Siyaasada ammaanka Qaran, qorshayaasha Qaran, xeerkan, xeer-nidaamyaha, tilmaamaha iyo jihaynta Madaxweynaha iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha.
    II. isagoo raacaya qorshaha jaangoynta Ciidanka, qorista ciidanka cusub, qaybinta ciidanka, agaasinka qalabka fadhiyada kala duwan, isagoo tixgelinaya baahida joogtada ah ee kolba jirta
    III. Magacaabista, xil ka qaadista, isku bedelka xilalka kala duwan ee Ciidanka Booliiska Somaliland.
    IV. Dalaacadda xubnaha ciidanka Booliiska, isagoo tixgelinaya jaangooyada Ciidanka iyo ku talogalka miisaaniyadda dalka.

V. Dalacaada darajooyinka ka hooseeya T/xigeenka Ciidanka Booliiska isagoo la tashanaaya Wasiirka Arrimaha Gudaha.
VI. Ogolaanshaha hawlgabka iyo xaqsiinta xubnaha Ciidanka
VII. Ogolaanshaha tababarada, waxbarashada iyo aqoon dirsadka xubnaha Ciidanka
VIII. Awoodaha uu sharcigu u siinayo bixinta abaalmarinta iyo anshax marinta xubnaha Ciidanka.
IX. Warbixinta Ciidanka Booliiska Somaliland

X. Hawlaha kale ee Xeerkan ama Xeer-nidaamyada Boolisku u xilsaaray.

XI. abuuridda Xarumaha tababarada ciidanka, noocyadooda, heerarka iyo manhajka tababarka.

# CUTUBKA LIXAAD
# ARRIMAHA CIIDANKA

## Qod: 20aad
## Dhammaadka shaqada Xubnaha Booliiska

Waxay ku dhammaanaysaa shaqada xubnaha Booliisku haddii la helo mid ama wax ka badan sabaha soo socda;

1. Geeri ku timaada Xubinta Booliiska.
2. Haday gaadho da'da hawlgabka, iyadoo ay shaqada sii hayn karto haddii dan guud loo arko.
3. Haddii dhakhtar caddeeyo in aanay hawsha gudan Karin.
4. Haddii ay iscasisho oo isla markaana laga aqbalo, waana in ay ahaataa qoraal.
5. Haddii shaqada laga eryo.
6. Haddii xukun lagu fuliyo taabanaysa sharafta iyo amaanada ay leeyahay.
7. Waxa la dhisayaa Xafiiska xaqsiintab Ciidanka, waxaana lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne.

## Qod: 21 aad
## Faylka xubnaha Ciidanka

1. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliiska, waxay yeelanaysaa fayl gaar ah oo loo sameeyo maalinta la qoro shaqada, iyadoo dhacdo kasta oo nolosheeda ciidanimo la

xidhiidha lagu kaydinayo, sida noocyada shaqo ee uu qabtay, tababarada uu qaatay, waxbarashada uu helay, dalacaada, xilka, abaal-marinta, anshax marinta, bedelka, hoos u dhigida, denbiyada uu galay, fasaxyada iyo dhacdo kasta oo kale oo ay tahay in la kaydiyo, iyadoo faylkaasi yeelanayo lambarka ciidan ee la siiyay maalintii la qoray.

2. Qaabka loo xafidayo, cida awooda u leh wax ka bedelkiisa iyo habka lagu ogolaan karo eegistiisa ama nuqul ka helidiisa waxaa lagu nidaaminayaa xeernidaamiyayaasha ciidanka Booliiska Somaliland.

**Qod: 22 aad**
**Derejada iyo Dirayska**

1. Darajada iyo dirayska Ciidanka Booliiska waxa lagu soo saarayaa xeer gaar ah.

2. Xubnaha ciidanku intaanu xeerka ku xusan faqrada 1aad ee qodobkani soo bixin waxay u kala saraynayaan sida xilkoodu u kala sareeyo.

**Qod: 23 aad**
**Fasaxyada**

Fasaxyada xubnaha Booliiska, noocyada fasaxa, hab-raaca fasax bixinta iyo cida awooda u leh fasax kasta, waxaa lagu nidaaminayaa Xeer-nidaamiyahaa Ciidanka Booliiska Somaliland.

**Qod: 24 aad**
**Mushaharada & Gunooyinka**

Xubin kasta oo Ciidanka Booliiska ahi:

1. waxay yeelanaysaa Mushahar go'an.
2. Waxay yeelan kartaa gunno.
3. Heerarka Mushaharka iyo gunnooyinka waxa lagu soo saarayaa xeer Madaxweyne.
4. in la siiyo mushahar u dhigma shaqada uu hayo.
5. Madaxweynaha ayaana ku soo saaraya xeer Madaxweyne markuu la tashado cida ay khusayso.
6. wuxuu kaloo mutaysan karaa gunno waxaana lagu faah-faahinayaa xeernidaamiyaha ciidanka Booliiska Somaliland.

**Qod: 25 aad**
**Dhimashada, Dhaawaca iyo Naafada xubnaha ciidanka Booliiska**

1. Xubinta ka mid ah Booliiska ee lagu dilo isagoo waajibaadka Ciidan gudanaya ama lagu dilo aargoosi ka dhashay waajibaadkiisa ciidan ee uu gudanayey waxaa magteeda bixinaysa Dawlada, isla markaana eedaysanaha waxaa la horgaynayaa cadaalada, iyada oo hadii dhibanuhu ama dhaxalxigeenka Marxuumku heshiis la galaan fal geystaha ay eedaysanaha u raaci doonaan magta iyo wixii khasaare medeni ah.
2. Xubin kasta oo Booliis ah oo lagu dhaawaco ama ku dhaawacanta ama naafawda ama waxyeelo soo gaadho, iyadoo waajibaad Ciidan gudanaysa waxay dawlada xaq ugu leedahay daawaynteeda iyo xannaanaynteeda.
3. Naafada iyo dhaawaca xubnaha Booliiska waxaa lagu nidaaminyaa Xeer-nidaamiyahaa Ciidanka Booliiska Somaliland

**Qod: 26 aad**

Hawlgelinta Ciidanka

Marka aan Xeerkan ama xeer-nidaamiyaha Booliiska si ka duwan loogu sheegin, Xubin kasta oo Ciidanka Booliiska ka tirsan waxaa loo bedeli karaa goobta uu shaqada ka hayay ama shaqo ka duwan shaqada uu hayay.

**Qod: 27 aad**

**Qiimaynta xubnaha ciidanka**

Qof kasta oo Ciidanka Booliiska ka tirsan, wax qabadkiisa, kartidiisa, asluubtiisa, daacadnimadiisa iyo hawl-karnimadiisa waxaa si joogta ah loogu samaynayaa qiimayn, iyadoo hab-raaca qiimaynta, ka go'aan qaadashada qiimaynta, iyo masuuliyiinta qiimaynta u xilsaaran lagu faahfaahin doona Xeer-nidaamiyaha.

**Qod: 28 aad**

**Dhaarta xubnaha Ciidanka**

Xubin kasta oo Ciidanka Booliiska Somaliland loo qaato marka shaqada la qoro waxay maraysaa dhaartan.

(**WAXAAN MAGACA ILAAHAY UGU DHAARANAYAA INAAN DAACAD U AHAANAYO JAMHUURIYADDA SOMALILAND; DALKEEDA, DADKEEDA IYO DIINTEEDABA. IN AAN SI DAACAD AH U ILLAALIYO DASTUURKA JAMHUURIYADA SOMALILAND, XEERARKEEDA, UGU ADEEGO SI AAN HAKRASHO LAHAYN AWAAMIIRTA MADAXDA SARE EE SHARCIGA WAAFAQSAN. WAXAAN KU DHAARANAYAA INAAN U DHAQMO SI SHARAF LEH, ASLUUB WANAAG IYO GEESINIMO, XAALAD KASTOO LAGU JIRO MID DAGAAL IYO MID NABADGELYOBA, ANIGOO ILLAALINAYA SIRTA CIIDAMMADA IYO TAN SHAQADDA, KUNA DHAQAAQAYA TALLAABO KASTA OO LAGU SUGAYO XANNAANAYNTA IYO DARYEELKA HANTIDA LA IGU AAMINAY**).

# CUTUBKA TODOBAAD

# ASLUUBTA & ANSHAX-MARINTA

**Qod: 29 aad**
**Hab-dhaqan asluubeedka Xubnaha Booliiska**

Ciidanka Boolisku wuxuu yeelanayaa Hab-dhaqan asluubeed, kaas oo tilmaamaya hab-dhaqan asluubeedka laga rabo xubinta Ciidanka Booliiska ah. Hab-dhaqan asluubeedka Ciidanka Booliiska waxaa lagu faah-faahinayaa Xeer-nidaamiyaha Ciidanka Booliiska.

# CUTUBKA SIDEEDAAD

# SHAQADA BOOLIISKA

**Qod; 30 aad**
**Cayimaada shaqada**

1. Xubin kasta oo Ciidanka Booliiska ka tirsan oo qabanaysa shaqo, waa in waajibaadkeeda, iyo awoodeedu cayiman tahay.

2. Waa in Hadal/qoraal loogu sheegaa hawsha ay u xilsaaran tahay, waajibaadkeeda iyo awoodeeda, isla markaana lagu tababaraa.

3. Nooca tababarka, xarumaha tababarka, xiligiisa iyo wixii la xidhiidha waxa lagu xusayaa Xeer-nidaamiyaha

4. Sarkaal ama Masuulka u dira hawl aan Sharciga waafaqsanayn xubin ama koox ciidanka Booliiska ah, isagaa ka masuul ah wax kasta oo khalad ama gef ama khasaare ka yimaada

**Qod: 31 aad**

**Shaqada Joogtada ah**

Waxaa loo aqoonsanayaa in si joogto ah shaqada Booliiska ugu jirto xubin kasta oo si rasmi ah loogu qaatay Ciidanka Booliiska oo:

a) Shaqada ku jirta
b) Fasax ku maqan
c) Shaqada laga hakiyay

# CUTUBKA SAGAALAAD
# HANTIDA, QALABKA, HUBKA & MIISAANIYADDA

DRAFT

**Qod: 32 aad**
**Hantida Ciidanka Booliiska**

1. Ciidanka Booliisku wuxuu yeelanayaa hanti guurta iyo ma guurto ah oo uu u adeegsanayo gudashada waajibaadkiisa, waana hanti qaran, cidina dan gaar ah uma isticmaali karto.

2. Dhammaan hantida ma guurtada ah ee Ciidanka Booliiska waa la diiwaangelinayaa.

~~3.~~ Taliyaha Ciidanka Booliisku wuxuu dejinayaa hab-raacyo maamul (Administrative procedures) oo si gaar-gaar ah loogu maamulo hantida Ciidanka.

**Qod: 33 aad**
**Daryeelka hantida iyo qalabka Booliiska**

Xubin kasta oo ciidanka ka mid ah waxa ku waajib ah ilaalinta, dayactirka iyo daryeelka hantida iyo qalabka Ciidanka Booliiska ee uu ka mas'uulka yahay.

**Qod: 34 aad**
**Hubka & Rasaasta**

Hubka Dawlada ayaa iska leh, Qoryaha iyo rasaasta lagu qarameeyo xubnaha ciidankana, waxay ka mid noqonayaan hubka ciidaanka, dibna looguma celinaayo xubinta ciidanka ka tagta ama laga eryo ama hawlgab noqota,

**Qod: 35 aad**
**Miisaaniyadda ciidanka Booliiska**

1. Dhaqaalaha Ciidanka Boolisku wuxuu ka iman karaa:

   a) Xaddiga miisaaniyada Qaranka looga qoondeeyay Booliiska
   b) Kaalmo xukuumada dhexe ku kabto
   c) Kaalmo D/hoose ku kabaan
   d) Qormada ganaaxyada sharcigu uga qoondeeyay
2. Maaliyada Booliiska waxaa lagu maamulayaa hab waafaqsan Xeerarka xisaabaadka dawlada, xeer-nidaamyada Booliiska iyo hab-raaca maamul ee xeerkan lagu sheegay.
3. Taliyaha Booliiska iyo saraakiisha uu u igmadaa waxay masuul ka yihiin ilaalinta, kormeerka, dabagalka habsami u maamulka maaliyada Booliiska.

**Qod: 36 aad**
**Hanti dhawrka xisaabaadka iyo hantida ciidanka**

Taliyaha Booliisku wuxuu abuurayaa hanti-dhawr gudaha ah. oo ciidanka gaar u ah oo ka kooban saraakiil aqoon dheer iyo waaya'aragnimo u leh xisaabaadka oo si waqtiile ah ama mar kasta oo loo baahdo.

1. Hanti dhawrka Qaranku marka uu lama huraan u arko, waxa uu baadhis xisaabeed ku sameeyn kara Booliiska guud ahaan ama talis gaarka ah.

**Qod: 37aad**
**Qaadhaanka Ciidanka Booliiska**

Ciidanka Booliisku waxuu samaysan karaa sanduuq dhaqaale oo ku yimaada qaadhaanka Ciidanka Booliiska dhexdooda, waxaana qeexi doonna xeer-nidaamiyaha

# CUTUBKA TOBNAAD

# MASUULIYADA GUUD & MASUULIYAD GAARA

**Qod: 38aad**
**Masuuliyad Denbi**

1. Xubnaha Ciidanka Boolisku waxay masuul ka noqonayaan denbiyada ay sida badheedhka ah u galaan, waxaana loo raacayo xeerarka ciidamada iyo xeerka ciqaabta guud.
2. Markuu taliyaha qaybtu/waaxdu ku qanco in xubinta ciidanku gashay faldenbiyeed mudan in maxkamad lagu horgeeyo, isagoo la-tashanaya taliyaha ciidanka, wuxuu gungaadhka dacwadda u gudbinayaa Xeer-ilaalinta ciidanka si haddii ay ugu ganacdo u samayso xaashida eedda, isla markaana ugu gudbiso Maxakamada awoodda u leh.

3. Haddii uu Taliyaha qaybtu/waaxdu u arko in aan falka xubintu gaadhsiisnayn in Maxkamad lagu horgeeyo ama uu Maxkamad u gudbinta ku waafaqi waydo Taliyaha Ciidanka, xubinta waxa lagu anshax marinayaa si waafaqsan xeerka anshaxa.
4. Xubnaha Ciidanku loo raaci maayo fal kasta oo ay ku galaan isticmaalka awooda xeerku bixiyey. gudasho waajib, is difaac, xaalad baahiyeed, sharci u adeegsi hub si waafaqsan qodobada 33, 34, 35 & 36 Xeerka ciqaabta guud.

**Qod: 39 aad**
**Masuuliyada Madani**

1. Xubinta Ciidanka Booliiska looma raacyo masuuliyad madani ah ama magdhaw ka dhashay fal ay ku gashay iyadoo sharciga ilaalinaysa gudanaysa hawsheeda ciidan si waafaqsan sharciga.
2. Dawlada ayaa masuul ka noqonaysa magdhawga madani ee ka yimaada:

    a) Falka xubinta ciidanka Booliisku ku gasho amar sarkaal awood u leh
    b) Falka xubinta Ciidanku ku gasho, iyadoo shaqadeeda gudanaysa, kama' ama taxadir daro.
    c) Magdhawga ama cawil celinta ka dhalata denbi ciqaab ah oo xubin ciidan ku gashay iyadoo shaqadeeda gudanaysa
    d) Fal kasta oo kale oo sharciga madanigu magdhawgeeda ku waajibinayo Dawlada
3. Qof kasta oo weerar ama hub kala hor yimaada ama hub ama xoog isku hortaaga Ciidanka Booliiska oo si sharciga waafaqsan u fulinaya amar ama hawlgal sharci ah, wuxuu masuul ka noqonayaa, khasaaraha naf ama maal ah ee soo gaadhay qofkaa ama cid sadexaad ama ciidanka hawsha fulinaya, marka falka waxyeelada gaystay uu lahaa qofkaasi ama ciidanka Booliiska oo falka u sameeyay si waafaqsan Qod: 33, 34, 35 & 36 Xeerka ciqaabta guud.
4. Xaaladaha lagu sheegay faqrada 3 aad ee qodobkan waa in baadhis madaxbanaan lagu sameeyo, si loo xaqiijiyo cida masuuliyada qaadaysa.
5. Baadhista Madaxabanaan ee lagu sheegay faqrada 4 aad ee qodobkan, waxaa samayn kara Xafiiska Baadhista ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
6. Ciidanka Boolisku masuul kama noqonayo dhibta soo gaadhay qof si sharci ah loo hayay ama loo qabanayay falka ay xubinta Booliiska ahi ku gaysato ka hortag baxsasho ama joojin baxsi, marka xubinta boolisku si taxadir leh u dhaqantay.

# CUTUBKA KAW & TOBNAAD

# WADA SHAQAYN

**Qod: 40 aad**

**Wada shaqaynta Ciidanka iyo maamulada Gobolada & Degmooyinka**

1. Fadhiyada Ciidanka Booliiska ee Gobollada waxay qabanayaan hawlaha la xidhiidha xoojinta nidaamka iyo sugidda nabadgelyada.
2. Ciidanka Booliiska waxa Gobollada uga Wakiil ah Taliyaha Qaybaha, oo isku xidhaya dhammaan laamaha Ciidanka Booliiska ee heer Gobol, isla markaana xidhiidhinaya Ciidanka Booliiska iyo maamulka gobolka iyo hay'adaha iyo laamaha kale ee xukuumada. Taliyaha Qaybta ee Gobolku wuxuu wada shaqayn la leeyahay Guddoomiyaha Gobolka, ciidammada iyo hay'adaha kale ee qaranka.
3. Degmo kasta waxay lahaanaysaa saldhig ama saldhiyo Booliis. Ciidanka ka tirsan saldhigga Booliiska ayaa maamulka degmada kala shaqaynaya xoojinta nidaamka iyo suggida ammaanka.
4. Taliyaha Saldhigu wuxuu wada shaqayn dhow la yeelanayaa Gudoomiyaha Golaha Degaanka ee Degmada.
5. Haddii ay dhacdo xaalado nabadgelyo-darro oo saameeya laba degmo ama ka badan ee isla hal Gobol, waxa agaasinka hawsha Booliiska la wareegaya Taliyaha Qaybta Booliiska Gobolkaas, isagoo la shaqaynaya Guddoomiyaha Gobolka, kana tilmaan qaadanaya Taliyaha Ciidanka.
6. Haddii Degmooyinka hawsha nabadgelyada laga qabanayaa ku yaaliin laba Gobol ama wax ka badan waxa awoodda hawlgelinta Ciidanka Booliiska la wareegaya Taliyaha Ciidanka, isagoo ka tilmaan qaadanaya Wasiirka Arrimaha Gudaha.
7. Haddii ay dhacdo in dembiile ka baxsado meesha uu dembiga ku galay, una gudbo Degmo kale, soo qabashadiisu waa waajib saaran fadhiga Booliiska ugu dhow, sidoo kale Booliiska Degmada uu dembiga ku galay waa raacdaysan karaan si loo soo qabto; waxase shardi ah inay la socodsiiyaan Booliiska xadka ay ka hawlgelayaan.
8. Gudoomiyayaasha Goboladu waxay Qaybaha Ciidamada Booliiska ee Goboladooda ka caawinayaan wax kasta oo suuragal ah oo ay hawshooda ku fulin karaan.
9. Gudoomiyayaasha Golayaasha Degmooyinka ee Magaalo Madaxyada Gobolada ee fadhiyada Talisyada Qaybuhu ku yaalaan, waxay Qaybaha Booliiska ee Degmooyinkooda ka taageerayaan dhaqaalaha iyo baahi kasta oo daruuri u ah gudashada hawshooda.
10. Gudoomiyayaasha Golayaasha Degmooyinka kale, waxay Taliyaasha Saldhigyada/saldhiga Degmooyinkooda ka taageerayaan dhaqaalaha iyo baahi kasta oo daruuri u ah gudashada hawshooda.
11. Ciidanka Booliiska ee Degmo kasta waxay D/hoose kala shaqaynayaan cashuur ururinta iyo arrimaha kale ay maamulada Degmooyinku gacan siin ka dalbadaan ee sharciga waafaqsan.
12. Wada shaqaynta Ciidanka Booliiska ee lagu sheegay faqradaha qodobkan, waxba uma dhimayso, wada shaqaynta iyo waajibaadyada dhinacyada ee lagu sheegay xeerka Anshaxa ilaalinta nabadgalyada,(Lr 51) xeerka wado marista, xeerka socdaalka iyo xeerarka kale ee dalka.

# CUTUBKA LABA & TOBNAAD

# QODOBO KAMA DANBAYS AH

## Qod: 41 aad
## Amarada & Tilmaamaha Joogtada ah

Taliyaha Ciidanka Boolisku wuxuu awood u leeyahay markii waqti la joogaba inuu soo saaro awaamiir joogto ah oo la xidhiidha hagaag u socodsiinta arrimaha uu dhigayo Xeerkan, xeer-nidaamyada hoos yimaada, ee waxyaabaha ku saabsan; fasaxyada, shaqo qoris, mushaharka, beddelka, shaqo ka saarid, tababarrada, isticmaalka hubka iyo rasaasta lebiska iyo qalabka, wadashaqaynta Booliiska iyo hay'adaha kale ee Xukuumada iyo wixii awaamiir ah ee sharciga waafaqsan ee fududaynaya hawlaha Ciidanka ama kartida iyo anshaxa hagaagsan ee Ciidanka ama arrimo kasta oo la xidhiidha arrimaha kor ku xusan.

## Qod: 42 aad
## Kormeerka dhaqangelinta & dhamaystirka Xeerkan

Kormeerka dhaqangelinta Xeerkan iyo dhamaystirka xeerarka, iyadoo la soo saarayo xeer-nidaamyada, hagayaasha, hab-raacyada iyo xafiisyada uu dhisayo, waxaa masuul ka ah Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

## Qod: 43aad
## Soo saaris Xeer-nidaamiyaha Xeerku waajibiyay

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudahu, isagoo kala tashanaya Taliyaha Ciidanka Booliiska, wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye aan ka hor-imanayn Xeerkan oo uu xeerkan ku dhaqangelinayo kuna faahfaahinayo, ugu badnaan sanad gudihii oo ka bilaabanta maalinta Xeerku dhaqangalo.

## Qod: 44 aad
## Tirtirid

Waxaa la tirtiray xeer kasta ama qodob xeer kasta oo xeerkan ka hor imanaya ama aan la jaan qaadi karayn.

## Qod: 45 aad
## Dhaqangalka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka Golayaasha sharci-dejintu ansixiyaan Madaxwaynuhuna saxeexo ee faafinta rasmiga ah lagu soo saaro.

DRAFT

# DHAMMAAD

DRAFT